



Ilaalinta xogta hawlaho hiwaayadda



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Nuxurka

Hordhac	2
Waa maxay macluumaadka shakhsiyadeed?	3
Maxaa loola jeedaa ilaalinta macluumaadka?	5
Barashada ereyada ilaalinta macluumaadka	6
Illaa iyo muddo intee leäeg ayaa la kaydinaya xogta hawlahi hiwaayadda?	7
Waa maxay xogta shakhs ahaaneed ee loo baahan yahay iyo sababta loo ururiyo?	8
Falanqaynta xogta shakhs ahaaneed waxay u baahan tahay aasaas in loo sameeyo	10
Oggolaanshaha diiwaangelinta	10
Heshiis	11
U hoggaansanaanta waajibaadka sharci ee diiwaan haya	11
La diiwaangeliyaha wuxuu leeyahay xuquuqda ilaalinta xogta	12
Sida loo helo macluumaadka ku saabsan xogta shakhs ahaaneed ee lagu falanqeeyay hawlahi hiwaayadda?	12
Sideen u codsan karaa tirtirka xogta?	13
Sideen u codsan karaa sixitaanka xogta?	14
Goorma ayuu mas'uulka u adeegsan karaa xuquuqda ilaalinta xogta isagoo ka wakiil ah ilmaha?	16
Goorma ayaa macluumaadka ku saabsan caafimaadka loogu baahan karaa hiwaayadda?	17
Maxay tahay in la tixgeliyo marka la falanaynaayo xogta shakhs ahaaneed?	19
Goorma ayaa sawiro ama fiidiyowyo la daabici karaa hawlahi hiwaayadda?	20
Yaa loo oggol yahay inuu ka shaqeeyo xogta shakhs ahaaneed ee hawlahi hiwaayadda?	21
Goorma ayaa la shaacin karaa macluumaadka hiwaayadaha?	22



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Hordhac

Ilaalinta macluumaadka waa xuquuqda aasaasiga ah ee qof walbaa leeyahay. Carruurta, dhalinyarada iyo waalidiintooda waa inay awoodaan inay aaminaan in xogtooda shakhsii ahaaneed loo falanqayn doono si waafaqsan sharciga, xitaa marka lagu guda jiro hawlahaa hiwaayadda. Qabanqaabiyyaha hiwaayadda dowr muhiim ah ayuu ku leeyahayka taxaddarista ilaalinta macluumaadka iyo dejinta nidaam wanaagsan: marka ilaalinta macluumaadka laga taxaddaro, dadka oo dhan waxay u xoogga saari karaan dhanka hiwaayadda, waxaanay ku kalsoonaan karaan arrinka ah, in macluumaadkooda shakshi ahaaneed uu ku jiro gacan wanaagsan.

Tilmaanbixintaan waxaan ku sheegeynnaa arrimaha ugu muhiimsan ee la xiriira ilaalinta macluumaadka iyo mabaad'iida ay tahay in tixgelinta la siiyo marka Igu guda jiro hawlahaa hiwaayadda.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Waa maxay macluumaadka shakhsiyadeed?

Macluumaadka qofka lagu aqoonsan karo ayaa la yiraahdaa **maluumaadka shakhsii ahaaneed**.

- Macluumaadka shakhsii ahaaneed waa magaca qofka ee dhammaystiran (sida Matti Meikäläinen), taariikhda dhalashada, lambarka aqoonsiga, cinwaanka guriga, telefoonka iyo iimeylka.
- Sidoo kale sawirrada iyo fiidiowyada qofka laga qaaday ama codka laga duubay waa macluumaad shakhsii ahaaneed. Tusaale ahaan sawirka kurka kore ah ee qofka laga qaaday waa mid lagu aqoonsan karo, qofka sawirkaas laga qaaday. Xittaa qofka sawirka u saaran baraha bulshada uusan magaciisu ku qornayn, waxaa qofka lagu aqoonsan karaa sawirkaas.

Qaar ka mid macluumaadka shakhsiyadeed way ka xasaasian yihiin kuwa kale. **Macluumaadka shakhsii ahaaneed ee gaarka ah** waa macluumaadka, qofka ka shaacinaya waxyaabaha qaarkood ee aan la shaac bixin karin ama xasaasiga ah. Macluumaadka noocaas oo kale ah waa in si wanaagsn loo ilaaliyo. Tusaale ahaan khasab ma ahan in dadku ay doonayaan in ay xanuunnada haya la wadaagaan dadka kale, Sidoo kalena dadka kale xaq uma lahan in ay ogaadaan xannuunada haya dadka kale.

- Macluumaadka shakhsii ahaaneed ee gaarka ah ee aan la soo shaac bixin karin waxaa ka mid ah:
- aaminsanaanta ama citiqaadka diineed ama falasfadeed ee qofka, taasoo loola jeedo nooca diinta ee uu qofku haysto ama haddii uusan diinba ku dhaqmin.
- macluumaadka caafimaadka (tusaale ahaan macluumaadka xanuunnada qofka haya ama macluumaadka bukaanka, kuwaasoo uu dhakhtarku ka qoray qaabiliaaddii u qofka qaabilay).

Marka hawla hiwaayadda lagu falanqaynaayo macluumaadka shakhsii ahaaneed eegaarka ah ee carruurta, sida macluumaadka ku saabsan xanuunnada, waa in tixgelinta la siiyo arrimaha soo socda:

- Macluumaadka shakhsii ahaaneed ee gaarka ah waa in loo falanqeeyaa si taxaddaer leh, si aanay dadka arrinkaan dibadda ka ah u ogaanin macluumaadkaas. Tusaale ahaan hagaha hiwaayadda xaalad kasta umau sheegi karo xanuunka ama xasaasiyadda ilmaha dhammaan hagayaasha kale ee hiwaayadda iyo carruurta kale ee hiwaayadda ka qaybqaadanaysa.
- Macluumaadka shakhsii ahaaneed ee gaarka ah waa in si taxaddar leh loo keydiyya. Tusaale ahaan waaa in laga taxaddaraa in waraaqaha ay ku qoran yihiin xogaha xasaasiga ah ee aan la shaac bixin karin, aan la dhigin meel uu qof arrinkaan dibadda ka ah ka kahrin karo ama uu waraaqaha ka xadi karo.
- Haddii macluumaadka shakhsii ahaaneed ee gaarka ah lagu kaydiyo nidaamka elektoroonigga ah, waa in la xaqijiyyaa in nidaamkaan uusan geli karin qof dibadda ka



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



TIEKE



Funded by
the European Union

ah hawlahaan. Waxaa arrinkaan loola jeedaa tusaale ahaan in la isticmaalo erey-sireed aad u xooggan, iyo in aan kombiyutarka ama qalabyada kale ee elektoroonigga ah looga tagin meel cidla ah oo aan la ilaalinayn.

- Qofka diiwaanhayaha ah waxaa ku waajib ah inuu xaqiijiyo arrinka ah, in dadka ka hoos shaqaynaaya isaga ay macluumaadka shakhsii ahaaneed u falanqaynaayaan sidii loogu talaggalay.



Maxaa loola jeedaa ilaalinta macluumaadka?

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay ilaalinta xogtiisa gaarka ah, taasoo loola jeedo **ilaalinta xogta**. Ilaalinta xogtu waxay ka ilaalisaa xogta gaarka ah ee dadka, tusaale ahaan, in internetka lagu siidaayo si qof walba u arko, ama in uu qof iska dhigo qof kale isagoo isticmaalaya magaca qofka kale, sawiro ama macluumaad kale.

Marka ilmuu ka qayb qaadanayo hiwaayadda, sida xisadaha qoob ka cayaarka, ururka partio ama tababarka kubbadda cagta, naadiga ama ururka qabanqaabinaya hiwaayadahaan waxay **falanqaynayaan** xogta shakhsiyeed ee ilmaha. Naadiga ama ururku waa inay si taxadar leh u falanqeeyaan xogta shakhsii ahaaneed. Waa inay ka taxaddaraan in dhammaan xogta shakhsii ahaaneed ay kaydsan tahay iyo in dadka dibadda ka ahi aanay heli karin.

Diiwaangelintu waxay la macno noqon kartaa, tusaale ahaan, in naadiga ciyaarta qabanqaabinayaa uu hayo liiska xubnaha ka ah macluumaadka meelaha lagala xiriiri karo xubnaha. Sidaa darteed diiwaanku waxa uu ka kooban yahay xog shakhsii ahaaneed. Mid ka mid ah diiwaan hayayaasha xogta, sida naadiga isboortiga, ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu hayo diiwaan ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan shaqaalaha naadiga.

Falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed waxaa loola jeedaa wax kasta oo qabanqaabiyyaha hiwaayadda uu ku sameeyo macluumaadka ku saabsan dadka hiwaayadda imaanaaya. Tusaale ahaan, ururinta, kaydinta ama u wareejinta macluumaadka dadka kale, waa falanqaynta xogta shakhsiyeed. Haddii ilmuu iska diiwaangeliyo koox isboorti ah, oo uu siiyo tababaraha kooxda magaca iyo macluumaadka xiriirka, kooxdoo waxay falanqayn doontaa xogta gaarka ah ee ilmaha. Kooxdoo waxa kale oo ay falanqaynaysaa xogta shakhsiga ah marka ay xogta ku kaydiyaan ama ay siiyaan xogta, tusaale ahaan, bogga internetka ee baahinaya natijjooyinka tartamada ciyaaraha. Falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed ayaa sidoo kale ah, marka uu tababaraha kooxdoo weydiyo ciyaaryahanka haddii uu xasaasiyad ku qabo wax uun, si uu ciyaaryahanku u helo cunto fudud oo aan ku jirin, tusaale ahaan, lowska.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



TIEKE



Funded by
the European Union

Barashada ereyada ilaalinta macluumaadka

Diiwaan hayaha waxaa loogu yeeraa qof, shirkad ama urur, kaasoo go'aamiya ujeedada xogta shakhsii ahaaneed loo isticmaalo iyo sida loo falanqaynaayo. Tusaale ahaan, naadiga hiwaayadda wuxuu ahaan karaa Diwaan haye haddii uu go'aamiyo sababta iyo sida xogta shakhsii ahaaneed ee dadka hiwaayadda imaanaaya loo falanqeeyo.

Imaha ama qofka weyn ee iska soo diwaangeliyay hiwaayaddawaa **la diiwaangeliyay**, taasoo macluumaadka uu qabanqaabiyyaha hiwaayadda sida naadiga isboortiga, uu falanqaynaayo.



Tusaale ahaan

Kooxda isboortiga ayaa go'aansatey in ciyaartoyda kooxda la weydiyo macluumaadka xiriirka si uu macalinku ula xiriiro ciyaartoyda marka uu samaynaayo jadwalka tababarka ee cayaartoyda. Ciyaartoyda waxaa laga codsanayaa inay foomka ku qoraan magacooda, cinwaanka guriga iyo lambarka taleefanka. Naadiga isboortiga ayaa xaaladdaan ah diiwaan hayaha, sababtoo ah naadigu wuxuu go'aaminayaa sababta iyo sida xogta shakhsii ahaaneed loo ururiyo.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Illaa iyo muddo intee leäeg aaya la kaydinaya xogta hawlaha hiwaayadda?

Xaddidaadda kaydinta xogta shakhsii ahaaneed waa mid ka mid ah mabaadii'da ilaalinta xogta. Marka lagu guda jiro hawlaha hiwaayadda waa in tixgelin gaar ah la siiyaa, baab'inta ama tirtirsta xogta shakhsii ahaaneed, si xogta shakhsii ahaaneed aan loo kaydin si aan loo baahnayn. Asal ahaan waa in xogta shakhsii ahaaneed la kaydiyo oo kaliya inta ay lagammamaarmaanka tahay ama loo baahan yahay.

Diiwaanhayuhu waa inuu aqoonsadaa ilaa iyo inta ay tahay in la hayo noocyada kala duwan ee xogta shakhsii ahaaneed, islamrkaana uu go'aamiyaa habka loo tirtirayo xogta. Haddii diiwaan hayuhu aanu hubin in la tirtiray xogta shakhsii ahaaneed ee aan loo baahnayn iyo inkale, waxaa khatar ah in xogta la kaydiyo dhowr sano iyada oo aan loo helin aasaas sharci ah oo lagu falanqeeyo. Xaaladdaan oo kale, tusaale ahaan, haddii ay dhacdo xog fakata ama dibadda u baxda, markaa xog badan oo shakhsiyeed aaya laga yaabaa inay ku gaarto dad dibadda ka ah arrinkaan, in kabadan marka loo eego haddii xogta shakhsii ahaaneed si habboon loo tirtiri lahaa markii aan loo baahnayn.

Marka la kaydinayo iyo marka la tirtirayo xogta shakhsii ahaaneed, waa in tixgelinta la siiyaa qaabka xogta loo falanqeeynaayo. Dadka hiwaayadda samaynaaya waa in lagu wargeliyaa muddada xogta shakhsii ahaaneed la kaydinaayo, ama ugu yaraan shuruudaha aasaaska u ah ee lagu qeexay muddada haynta. Go'aaminta xilliyada kaydinta iyo qorsheynta kaydinta waa qayb ka mid ah waajibaadka qabanqaabiyaha hawlaha hiwaayadda, si uu u muujiyo inay u hoggaansan yihiin xeerarka ilaalinta xogta.

Muddada kaydinta xogta shakhsii ahaaneed ee xogaha aarkood waxa lagu qeexaa sharciga, sida macluumaadka la xiriira shaqada ama xisaabinta. Xaaladdan oo kale, xogta shakhsiga ah waxaa la kaydin doonaa muddada sharcigu qeexay, kaddibna waa la tirtiri doonaa.

Si kastaba ha ahaatee, lama qeixin muddada dhabta ah ee kaydinta dhammaan noocyada xogta shakhsii ahaaneed, ah, tusaale ahaan dhanka sharciga. Xaaladdan oo kale, diiwaan hayuhu waa inuu isagu caddeeyaa illaa iyo muddo intee le'eg aaya xogta shakhsii ahaaneed la kaydinaya. Asal ahaan go'aaminta xilliga kaydinta waa in xogta shakhsii ahaaneed la kaydiyo oo keliya inta ay lagammamaarmaanka u tahay isticmaalkooda loogu talagalay. Xogta waa in la tirtiraa marka aysan jirin sababo loo lafalanqaynaayo xogtaas, islamrkaana aan loo baahnayn qabanqaabinta hawlaha hiwaayadda. Tusaale ahaan, marka uu hiwaayad sameeyuhu joojiyo hiwaayadda, waajib ma ahan in diiwaan hayuhu uu hayo dhammaan xogta shakhsii ahaaneed ee qofkii hiwaayadda samaynaayay.

Marka la kaydinaayo xogta shakhsiyad ahaaneed ee kooxaha gaarka ah, sida xogta caafimaadka, waa in la tixgeliyaa soo shaacbixin la'aanta xogta iyo khataraha ka iman kara haddii macluumaadka hiwaayad sameeyaha uu faafo. Gaar ahaan, tan waa in la tixgeliyo marka ay timaado macluumaadka caafimaadka ilmaha yar. Macluumaadka caafimaadka waa in loo kaydiyyaa qaab dadka dibadda ka ahi aanay u helin macluumaadka, waana in aan xogta loo gudbinin koox ka ballaaran intii loo baahnaa.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Waa maxay xogta shakhsii ahaaneed ee loo baahan yahay iyo sababta loo ururiyo?

Qabanqaabiyaasha hawla ha hiwaayadda ayaa laga yaabaa inay ururiyan oo ay isticmaalaan xogta shakhsii ahaaneed ee hiwaayadaha ujeedooyin badan oo kala duwan. Hiwaayadla waxaa laga yaabaa in la weydiyo macluumaadkaan am akan waalidkiis. Macluumaadka xiriirka waxaa badanaa loo baahan yahay si loogu wargaliyo hawla iyo isbeddelada jadwalka hiwaayadda ee suurtagalka ah. Inta badan waxaa jira lacag loogu talagalay hiwaayadda. Dhab ahaan, macluumaadka xiriirka ayaa sidoo kale loo baahan yahay si loo maareeyo arrinka la xiriira soo dirista biilka ama kharashaka hiwaayadda. Macluumaadka xiriirka ayaa muhiim u ah qofka mas'uulka ka ah hawla ha hiwaayadda si uu u soo sheego hawla kediska ama xaaladaha aan caadiga ahayn ee suuraggalka ah in ay yimaadaan.

Hiwaayadda darteed, ayaa waxaa la codsan karaa tusaale ahaan macluumaadka ku saabsan cudurrada iyo xasaasiyadda, si hiwaayaddu ay u noqoto mid ammaan ah. ilmaha ku lug leh hiwaayadda waxaa laga yaabaa inuu yeesho xasaasiyad daran ama xanuun dabadheeraada, sdias awgeed ayaa dadka waaweyn ee ku hareeraysan ilmaha ay tahay inay ogaadaan ammaanka ilmaha. Dhanka kale, macluumaadka ku saabsan caafimaadka ee aan khusayn hiwaayaddaada waa xog aan loo baahnayn, mana ahan in la sheego. Madaxa hawla ha hiwaayadda sidoo kale xaq uma laha inuu falanqeeyo macluumaadkaas aan loo baahnayn.

Qabanqaabiyaaha hiwaayadda waa inuu u sheegaa hiwaayadla sababta xogta shakhsii ahaaneed loo ururiyay, waxa loogu baahan yahay iyo sida loo isticmaalo. Tusaale ahaan, haddii koox isboorti ay ka codsato hiwaayadla macluumaadka xiriirka ama macluumaadka ku saabsan cudurrada ama xasaasiyadaha, waa inay u sheegaan ujeedada ay uga baahan yihii macluumaadkaas.

Hawladeenka hiwaayadda waa inuu u falanqeeyaa xogta hiwaayadda ujeeddada uu markii hore u codsaday. Ma ahaan karto, tusaale ahaan, kuma wareejin karo macluumaadka uu hiwaayadluhu siiyay qolo kale, isagoo aan oggolaansho ka haysan.

Marka qabanqaabiyaaha hawla ha hiwaayadda uu hayo macluumaadka ku saabsan hiwaayadla, waa inuu u sheego isaga

- yaa mas'uul ka ah falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed
- sababta xogta gaarka ah loogu baahan yahay
- Ilaa intee in le'eg ayaa loo baahan yahay xogta shakhsii ahaaneed
- in xogta gaarka ah la gudbin doono iyo inkale
- Side ayuu hiwaayadluhu u isticmaali karaa xuquuqda la xiriirta macluumaadka shakhsii ahaaneed.



Sida caadiga ah, qabanqaabiyyaha hawlaha hiwaayadda waxaa macluumaadkaan u uku sheegaa tusaale ahaan, boggooda internetka. Wuxuu laga yaabaa inay lahaato, tusaale ahaan, bayaan ilaalinta xogta ama bog kale oo la mid ah halkaas oo ay ku sheegayaan falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed. Sidoo kale marka la isku diwaangelinayo hiwaayadda, tusaale ahaan marka macluumaadka lagu bixiyo foom ahaan, hiwaaydlaха waa in lagu wargeliyaa arrinka ah falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed waxay u baahan tahay aasaas in loo sameeyo

Shuruudda ah in falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed ay u hoggaansanto sharciga waa mid ka mid ah mabaadi'da ilaalinta xogta. Waxay la macno tahay in had iyo jeer uu jiro aasaas sharci ah oo ku saabsan falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed.

Aasaaska falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed waa in la doortaa ka hor inta aan hawsha la bilaabin. Xogta shakhsiga ah waxaa lagu falanqayn karaa dhowr aaasaas oo falanqayneed oo kala duwan, tusaale ah ahan waxaa jiri kara in ka badan hal saldhig oo lagu falanqeeyo xogta shakhsii ahaaneed. Marka falanqaynta xogta shakhsiyeed lala xiriiriyo aasaas habaysan, aasaaskaas looma bedeli karo mid kale. Haddii aysan jirin wax sharci ah oo ku salaysan falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed, falanqayntoodu waa sharci darro. aasaaska falanqaynta waxa uu saameeyaa, arrimaha ay ka midka yihin, xuquuqda ilaalinta xogta ee la isticmaalaayo.

Macluumaadka shakhsii ahaaneed waxaa si sharciga waafaqsan loogu falanqayn karaa, marka ay ku salaysan yihin arrimaha soo socda:

Oggolaanshaha diiwaangelinta

Qofku wuxuu bixin karaa ogolaanshiisa ah, in xogtiisa gaarka ah loo falanqayn karo si ujeedo gaar ah. Oggolaanshaha waxaa lagu bixin karaa qoraal ama hadal ama ficol kale oo cad, sida in istallaab la saaro afar geeska yar ee ku yaalla bogga intenetka.

Qofka la diiwaangeliyay wuu bixin karaa ogolaanshaha si hore ah oo la qeexay, ujeedo gaar ah oo sharci ah ee falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed. Oggolaanshaha shakhsii ahaaneed macneheedu waa in marka oggolaanshaha la cadsanaayo la sheegaa ujeeddada gaarka ah ee loo isticmaalaayo xogta la uruurinaayo. Oggolaanshaha sidoo kale waa inuu noqdaa mid run ahaantii ikhtiyaari ah. Qofka la diiwaangelinaayo waa inuu haystaa fursad uu ku diidi karo oggolaanshaha, sidoo kale waa inuu awood u yeeshaa in uu kansali karo ama iska baajin karo oggolaanshaha, iyadoo aanay wax dhibaato ah ka dhalanayn.

Oggolaanshuhu sidoo kale waa inuu noqdaa mid aan madmadow lahayn oo cad, tusaale ahaan aamusnaanta, arrin ka mid ah oo aan la samayn ama istallaab hore loo saaray foomka la diyaariyay, ma ahan calaamad muujinaysa oggolaanshaha qofka. Tusaale ahaan, marka ilmuuhu isu diiwaan geliyo hiwaayadda ciyaaraha isagoo isticmaalaya foom elektaroonig ah, foomku asal ahaan kuma dari karo qayb waydiisanaysa oggolaanshaha in lagu daabaco sawirada kooxda booggooda internetka, ama si fudud u sheegaya in ku biirista kooxda ciyaaraha ay si toos ah u siiso oggolaanshaha baahinta sawirrada.



Heshiis

Marka qofka la diiwaangeliyay uu qayb ka yahay heshiiska, xogtiisa gaarka ah waa la falanqayn karaa si loo fuliyo heshiiska. Tusaale ahaan, haddii uu qof ka dalbado naadiga isboortiga funaanada koofiyada leh ee taageerayaasha, naadiga Isboortiga aayaa falanqayn kara macluumaadka cinwaankiisa, si alaabta loogu keeno. Waa muhiim in la qeexo nuxurka saxda ah iyo yoolka heshiiska, sababtoo ah waxaa loo isticmaalaa in lagu qiimeeyo in falanqaynta ay lagama maarmaan tahay. Keliya xogta shakhsii ahaaneed ee lagama maarmaanka ah ayaa la falanqayn karaa.

U hoggaansanaanta waajibaadka sharci ee diiwaan hayaha

U hoggaansanaanta waajibaadyada sharciga ah ee diiwaan hayaha waxaa shardi u noqon kara in diiwaan hayuhu uu falanqaynaayo xogta shakhsii ahaaneed. Xaaladdan oo kale, sharcigu wuxuu dhigayaa in xogta shakhsii ahaaneed loo falanqeyn karo si ujeeddo gaar ah leh.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

La diiwaangeliyaha wuxuu leeyahay xuquuqda ilaalinta xogta

Marka qabanqaabiyaha hawlaha hiwaayadda uu ka diiwaan haye ahaan u falanqeeyo xogta shakshi ahaaed, waa in uu ka taxaddaraa hirgelinta xuquuqda ilaalinta xogta diiwaangashan. Xuquuqda ilaalinta xogta waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, xaqa hiwaayadluhu u leeyahay inuu helo macluumaadka naftiisa ku saabsan iyo inuu saxo macluumaadka khaldan. Qabanqaabiyaha hawsha hiwaayadda waa in uu fududeeyaa adeegsiga xuquuqda oo uu ku wargeliyaa hiwaayadlayasha sida ay u isticmaali karaan xuquuqdooda ilaalinta xogta.

Sida loo helo macluumaadka ku saabsan xogta shakhsii ahaaneed ee lagu falanqeeyay hawlaha hiwaayadda?

Qofka hiwaayadlaha ah wuxuu xaqq u leeyahay inuu waydiyo qabanqaabiyaha hawlaha hiwaayadda macluumaadka uu qabanqaabiyuhu ka hayo hiwaayadlaha. Tan waxaa lagu magacaabaa xaqa helitaanka macluumaadka. Qabanqaabiyaha hawlaha hiwaayadda waa inuu u sheegaa hiwaayadlaha xogta shakhsii ahaaneed ee uu ka hayo. Macluumaadka ku saabsan xogta shakhsiga ah ee la falanqeeyo waxaa lagu bixin karaa, tusaale ahaan, iimayl ahaan ama warqad.

Sida loo codsado fiirfiirinta macluumaadka:

- Macluumaadka waa in si toos ah looga codsadaa qabanqaabiyaha hawsha hiwaayadda.** Bogagga internetka qabanqaabiyayaasha hiwaayadda badanaa waxay leeyihii bog ilaalinta xogta, kaasoo aad ka heli karto tilmaamo ku saabsan samaynta codsiga. Hawlaha hiwaayadda, waxaad had iyo jeer aadi karttaa dhanka macalinka ama tababaraha oo aad waydiisan kartaa qofka saxda ah ee codsiga loo gudbinaayo.
- Codsiga, waa inaad ku sheegtaa macluumaadka aad rabto inaad hesho.** Tusaale ahaan, waxaad ku qori kartaa codsiga inaad jeceshahay inaad hesho dhammaan macluumaadka shakhsiyeed, kuwaao uu qabanqaabiyaha hiwaayaddu falanqeeyo.
- Hawladeenka hiwaayadda waa in uu caadi ahaan kaga soo jawaabaa codsiga hal bil gudaheed.**
- Haddii qabanqaabiyaha hawlaha hiwaayadda uusan ka jawaabin codsiga bil gudaheed, ama haddii uu sheegto in uusan doonayn inuu bixyo macluumaadka, codsaduhu wuxuu la xiriiri karaa wakiilka ilaalinta xogta. Xafiiska wakiilka ilaalinta xogta waa hay'ad kormeerta in ilaalinta xogta, in sidii loogu talaggalay looga hirgeliyo hiwaayadda dhexdeeda. Xaaladaha qaarkood, xafiiska wakiilka ilaalinta xogta ayaa ku amri kara hiwaayad sameeyaha inuu siiyo hiwaayadlaha macluumaadka la codsaday.**

Macluumaadka xiriirkayaga waxaa laga heli karaa: [Children's data protection rights | Office of the Data Protection Ombudsman](https://tietosuoja.fi/en/children-s-data-protection).¹

Macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan gelitaanka xogta shakhsii ahaaneed waxaa laga heli karaa mareegaha xafiiska Wakiilka Ilaalinta Xogta: [When you want to inspect your data | Office of the Data Protection Ombudsman](https://tietosuoja.fi/en/when-you-want-to-inspect-your-data).²



Tusaalahaa codsiga lagu soo diri karo iimaylka:

"Haye,

Anigu waxaan ahay Matti Meikäläinen waxaan u ciyaraa kooxda kubbadda barafka ee 12 jirka ee Sateenkaari Yksisarviset ry. Waxaan jeelaan lahaa inaan helo dhammaan macluumaadkayga gaarka ah ee naadigu ku hayo diiwaanka. cinwaanka iimaylkaan ma iigu soo diri kartaan kartaa macluumaadka ku saaban arrinkaas?"

Sideen u codsan karaa tirtirka xogta?

Qofka hiwaayadda u leh waxa laga yaabaa inuu marmar xaq u yeesho inuu ka codsado qabanqaabiyyaha hawla ha hiwaayadda inuu tirtiro macluumaadka hiwaayadda ee uu ku kaydiyay diiwaankiisa. Haddii hiwaayaduhu codsado tirtirka macluumaadka qaar oo la tirtiro, qabanqaabiyyaha hawsha hiwaayadda waxa laga yaabaa inaanu sii haynin. Haddii xogta hiwaayadda oo dhan la tirtiro, hiwaayaduhu waa in aanu haynin wax xog shakhsii ah oo ku saabsan hiwaayadda.

Qabanqaabiyyaha hawsha hiwaayadda waa in uu tirtiraa xogta gaarka ah ee hiwaayadda, tusaale ahaan:

- Marka aysan u baahnayn xogta. Tusaale ahaan, qabanqaabiyyaha hiwaayadda uma baahna inuu xafido dhammaan xogta shakhsii ahaaneed ee hiwaayadda haddii hiwaayaduhu joojiyo hiwaayadda.
- Marka uu hiwaayaduhu ka noqdo ogolaanshaha uu hiwaayaduhu hore u bixiyay. Haddii, tusaale ahaan, hiwaayad-yaqaanku uu siiyay macluumaad ku saabsan xanuunkiisa qabanqaabiyyaha hiwaayadda isagoo raalli ka ah, hiwaayadda wuxuu codsan karaa in macluumaadka la tirtiro wakhti kasta. Xaaladdaas, qabanqaabiyyaha hawsha hiwaayadda ma sii wadi karo macluumaadka uu ku helay ogolaanshaha.

¹ <https://tietosuoja.fi/en/children-s-data-protection>

² <https://tietosuoja.fi/en/when-you-want-to-inspect-your-data>

Mar kasta suurtagal ma aha in la tirtiro ama la beddolo dhammaan xogta hiwaayadda. Xogta qaar ayaa laga yaabaa in la hayo, tusaale ahaan sharciga dartiis.

Sida loo sameeyo codsi lagu tirtirayo xogta:

1. Tirtirka xogta waa in si toos ah looga codsadaa qabanqaabiyyaha hawsha hiwaayadda. Bogagga internetka qabanqaabiyyaasha hiwaayadda badanaa waxay leeyihiin bog ilaalinta xogta oo aad ka heli karto tilmaamo ku saabsan samaynta codsiga. Hawlaha hiwaayadda, waxaad had iyo jeer u aadi kartaa macalinka ama tababaraha oo aad waydiisan kartaa qofka saxda ah ee codsiga loo gudbinayo.
2. Codsigu waa in lagu sheegaa xogta gaarka ah ee uu hiwaayadluhu uu doonaayo inuu tirtiro iyo sababta, ama haddii hiwaayadluhu rabo in la tirtiro dhammaan xogta shakhsii ahaaneed.
3. Hiwaayad sameeyuhu waa inuu caadi ahaan ku soo jawaabaa hal bil gudaheed.
4. Haddii hiwaayad-yaqaanku aanu kaga jawaabin codsiga bil gudaheed ama uu diido inuu tirtiro xogta, hiwaayadluhu wuxuu la xiriiri karaa wakiilka ilaalinta xogta. Xafiiska wakiilka Ilalinta Xogta waa hay'ad kormeerta in ilaalinta xogta sidoo kale lagu fuliyo hiwaayadaha. Xafiiska wakiilka ilaalinta xogta ayaa mararka qaarkood ku amri kara qofka wax xiiseeya inuu ka saaro xogta shakhsiyeed ee diiwaanka. Macluumaadka xiriirkayaga waxaa laga heli karaa: [Children's data protection rights | Office of the Data Protection Ombudsman](#).³

Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan tirtirka xogta shakhsii ahaaneed waxaa laga heli karaa mareegaha Xafiiska Wakiilka Ilalinta Xogta: [If you would like to have your data erased | Office of the Data Protection Ombudsman](#).⁴

Sideen u codsan karaa sixitaanka xogta?

Tusaale ahaan, haddii hiwaayadluhu uu ogaado in magaca hiwaayadda si khaldan loogu qoray macluumaadka hiwaayadda, ama xirfadlahu uu haysto ciwaankii hore ee hiwaayadluha ahaa, hiwaayadluhu wuxuu codsan karaa in khaladaadka ku jira macluumaadka la saxo.

Sixitaanka xogta macneheedu waxaa loola jeedaavigaste andmete parandamist

- sixitaanka macluumaadka khaldan

³ <https://tietosuoja.fi/en/children-s-data-protection>

⁴ <https://tietosuoja.fi/en/if-you-would-like-to-have-all-of-your-data-erased>

- macluumaaad kabis ah

Sida loo gudbiyo codsiga xogta saxda ah:

1. **Saxitaanka macluumaaadka waa in si toos ah looga codsadaa qabanqaabiyyaha hawsha hiwaayadda.** Bogagga internetka qabanqaabiyyaasha hiwaayadda badanaa waxay leeyihiin bog ilaalinnta macluumaaadka, kaasoo aad ka heli karto tilmaamo ku saabsan samaynta codsiga. Hawlaha hiwaayadda, waxaad aadi kartaa dhanka macallinka ama tababaraha oo aad waydiisan kartaan qofka saxda ah ee codsiga loo gudbinayo.
2. Codsga waa iin lagu sheegaa xogta shakhsii ahaaneed ee hiwaayadluhu rabo inuu saxo iyo sida uu u rabo in loo saxo.
3. Hiwaayad qabanqaabiyyaha waa inuu caadi ahaan ku soo jawaabaa **hal bil gudaheed**.
4. Haddii hiwaayad qabanqaabiyyaha aanu kaga jawaabin codsiga bil gudaheed ama uu diido inuu saxo xogta, hiwaayadluhu wuxuu la xiriiri karaa wakiilka ilaalinta xogta. Xafiiska wakiilka Ilaalinta xogta waa hay'ad kormeerta in ilaalinta xogta sidoo kale lagu fuliyo hiwaayadaha. Xafiiska wakiilka ilaalinta xogta ayaa mararka qaarkood amri kara hiwaayad sameeyaha inuu saxo xogta shakhsiyeed. Macluumaaadka xiriirkayaga waxaa laga heli karaa: [Children's data protection rights | Office of the Data Protection Ombudsman](https://tietosuoja.fi/en/children-s-data-protection).⁵

Macluumaaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan saxitaanka xogta waxaa laga heli karaa bogga internetka ee xafiiska Guddoomiyaha Ilaalinta Xogta: [If you want to have your data rectified | Office of the Data Protection Ombudsman](https://tietosuoja.fi/en/if-you-want-to-have-your-data-rectified).⁶

⁵ <https://tietosuoja.fi/en/children-s-data-protection>

⁶ <https://tietosuoja.fi/en/if-you-want-to-have-your-data-rectified>

Goorma ayuu mas'uulka u adeegsan karaa xuquuqda ilaalinta xogta isagoo ka wakiil ah ilmaha?

Qof kasta oo naga mid ah, oo ay ku jiraan carruurta aan qaangaarin iyo dadka da'da yar, waxaan leenahay dhowr xuquuq ilaalinta xogta ah. Marka hore, carruurta iyo dhallinyaradu waxay xaq u leeyihiin inay helaan maclumaadka ku saabsan, sababta xogtooda shakhsi ahaaneed loo falanqaynaayo, ujeedooyinka iyo muddada kaydinta. Ilmaha ama qofka dhallinyarada ah waxa uu waydiin karaa hawladeenka hiwaayadda u haya maclumaadka isaga ku saabsan ee uu falanqaynaayo, isagooo codsan kara koobiga maclumaadka. Ilmaha ama qofka dhallinyarada ah waxa kaloo uu codsan karaa in hawladeenka hiwaayadda ah uu saxo khalandka ku jira maclumaadka ilmaha ama qofka dhallinyarada ah, ama uu dhamaystiro maclumaadka. Xaaladaha qaarkood, ilmo ama qof dhallinyarada ah ayaa sidoo kale codsan kara in la tirtiro wixii maclumaad ah ee iyaga ku saabsan in la tirtiro, haddii uusan rabin in mar dambe uu hiwaayad sameeyuhu kaydiyo. Xaaladaha oo dhan, si kastaba ha ahaatee, tirtirida xogta suurtagal maaha haddii hiwaayad sameeyuhu uu haysto sabab sharci ah oo lagu hayo xogta.

Asal ahaan, mas'uulka ama wakiilka cunugga wuxuu isticmaali karaa xuquuqda ilaalinta xogta isagoo ka wakiil ah cunugga yar. Waa in la ogaadaa in xaaladaha qaarkood mas'uulka uusan xaq u lahayn inuu isticmaalo xuquuqda ilaalinta xogta isagoo u hadlaya ilmaha. Carruurta aan qaangaarin waxay xaq u leeyihiin inay helaan maclumaadkooda, sharciyada qaarkoodna waxay qeexayaan in carruurta aan qaangaarin ay xaddidi karaan xaqa ay mas'uuliyiintooda u leeyihiin inay helaan maclumaadka. Marka ilmuu sii weynado, wawa kale oo laga yaabaa inuu awood u yeesho inuu keligiis wax ka qabto arrimaha la xiriira falanqaynta xogtiisa gaarka ah, taas oo uu xaq u leeyahay inuu waalidka u diido inay helaan xogtiisa gaarka ah.

Haddi ilmo ama qof dhalinyaro ah ama waalid ka wakiil ah iyaga ay rabaan inay adeegsadaan xuquuqda ilaalinta xogta, waa inay la xiriiraan diiwaanhayaha xogta. Hawlaha hiwaayadda, codsiga isticmaalka xuquuqda ilaalinta xogta waa in lagu hagaajiyya naadiga ama ururka hiwaayadda, tusaale ahaan iyadoo lala xiriirinayo. Maclumaad dheeraad ah oo faafhaahsan oo ku saabsan marka masuulku isticmaali karo xuquuqda ilaalinta xogta ilmahooda waxa laga heli karaa maqaalka: [Data protection is a fundamental right for minors – what does it mean? | Data protection in hobbies](https://tietosuojaharrastuksissa.fi/en/data-protection-is-a-fundamental-right-for-minors-what-does-it-mean).⁷

⁷<https://tietosuojaharrastuksissa.fi/en/data-protection-is-a-fundamental-right-for-minors-what-does-it-mean/>

Goorma ayaa macluumaadka ku saabsan caafimaadka loogu baahan karaa hiwaayadda?

Macluumaadka caafimaadku waa macluumaad ka warramaya caafimaadka jir ahaaneed ama maskaxeed ee qofka. Sidoo kale waa xog shakhsii ahaaneed.

Macluumaadka caafimaadku waa tusaale ahaan

- macluumaadka ku saabsan cudurrada bani'aadamka ama xasaasiyadda, sida macaanka ama xasaasiyadda lowska
- macluumaadka ku saabsan caafimaadka maskaxda ee qofka
- macluumaadka ku saabsan daawooyinka uu qofku isticmaalo
- ogaanshaha in qofku uu arkay dhakhtar.

Xogta caafimaadka waa in si dhab ah loo ilaaliyo. Xogtu waxay noqon kartaa mid xasaasi ah oo qof kastaa uusan rabin inuu dadka kale la wadaago. Xilliga hiwaayadda lagu guda jiro hagahaaga ama tababarahaagu waxa laga yaabaa tusaale ahaan inaanu dadka kale u sheegin wax ku saabsan xasaasiyadda ama jirradaada.

Hiwaayadda awgeed, waxaa laga yaabaa in adiga ama mas'uulkaaga la weydiyo macluumaadka ku saabsan cudurraadaada, daawooyinkaaga ama xasaasiyadda. Macluumaadka ayaa laga yaabaa in loo baahdo si loo hubiyo caafimaadkaaga iyo ammaankaaga hiwaayadda.

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad maskaxda ku haysaa inaadan u baahnayn inaad bixiso dhammaan macluumaadkaaga caafimaadka hiwaayadda. Wuxaa bixin kartaa oo keliya macluumaadka sida cad lagama maarmaanka u ah. Haddii aad xasaasiyad ku leedahay lowska oo aad ka qaybqaadato xerada kaynta ee roondada, halkaas oo macalinku kuugu qaybinayo cunto fudud, waa muhiim inaad u sheegto macalinkaaga xasaasiyadda si aadan si lama filaan ah u cunin lawska. Taa beddelkeeda, ma aha inaad sheegto, tusaale ahaan, inuu kugu dhacay busbus saddex sano ka hor.

Mararka qaarkood macluumaadkaaga caafimaad waxa lagaa codsan karaa ogolaansho ku salaysan, taasoo ah inaad adiga nafsad ahaantada go'aan ka gaari karto in aad doonayso inaad macluumaadkaas bixiso iyo inkale. Markaa uma baahnid inaad macluumaadkaaga caafimaad la wadaagto qabanqaabiyyaha hiwaayadda haddii aadan rabin.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Waxaad fiirfrin kartaa arrinka ku saabsan falanqaynta xogta caafimaadka ee hawlaho hiwaayadda adiga oo akhrinaya maqaalkan soo socda: [Processing children's health data in hobby activities | Data protection in hobbies](#).⁸

⁸ <https://tietosuojaharrastuksissa.fi/en/processing-childrens-health-data-in-hobby-activities/>

Maxay tahay in la tixgeliyo marka la falanaynaayo xogta shakhsii ahaaneed?

Xogta shakhsiyeed waa in had iyo jeer si taxadar leh loo falanqeeyaa. Nidaaminta xogta shakhsii ahaaneed, waa in la tixgeliya arrimaha ay ka midka yihin mabda'a wax yaraynta, amniga falanqaynta xogta, iyo arrimaha ku saabsan dhiibista xogta, iyo waxyaabo kale.

Sharciga ilaalinta xogta, *mabda'a yaraynta* macnaheedu waa indiiwaanhayuhu aanu falanqayn karin xogta shakhsii ahaaneed ee aan loo baahnayn. diiwaanhayuhu waxa uu falanqayn karaa oo keliya macluumaadka lagama maarmaanka u ah si loo fuliyo ujeeddo gaar ah.

- Tusaale ahaan, haddii kooxdu ay codsato macluumaadka ku saabsan cudurrada hiwaaydla iyo xasaasiyadda si ay ugu xisaabtanto hawlahooda, waa inaysan codsan dhammaan macluumaadka suurtogalka ah ee ku saabsan xaaladda caafimaad, laakiin kaliya macluumaadka lagama maarmaanka ah. Macluumaadka lagama maarmaanka ah ayaa laga yaabaa, tusaale ahaan, inuu noqdo macluumaadka ku saabsan xasaasiyadda cuntada, haddii naadigu uu mas'uul ka yahay u qaybinta cuntooyinka fudud ee hiwaaydlayaasha.
- Macluumaadka qaar ayaa lagama maarmaan u ah hawlahi hiwaayadda, markas oo la ururin karo. Way caddahay in hawlahi hiwaayadda ah, magaca iyo macluumaadka xiriirka ee ilmaha ama qofka dhallinyarada ah ee ka qayb qaadanaya hiwaayadda waa in la yaqaan, ama ugu yaraan macluumaadka xiriirka ee waalidka, si xiriir loola yeesho kuwa hiwaayadlayaasha.

Waa in la ogaadaa in xogta shakhsii ahaaneed aan loo shaacin dhinacyada dibadda. Asal ahaan, tusaale ahaan, xubnaha kooxda isboortiga xaq uma laha inay ogaadaan macluumaadka shakhsiyeed ee xubnaha kale, sida macluumaadka xiriirka ama macluumaadka ku saabsan xaaladda caafimaadka. Sidoo kale, ma aha dhammaan shaqaalaha ama mutadawiciinta ku shaqeeya magaca maamulaha, tusaale ahaan naadiyada isboortiga, waa inay xaq u leeyihiin inay ka baaraandegaan xogta carruurta sameeya ciyaaraha.

Xogta shakhsiga ah waa in si ammaan ah loo kaydiya si aanay ugu dambayn gacmaha shisheeye. Tani waxay la macno tahay amniga nidaamka macluumaadka ama, tusaale ahaan, in xogta shakhsiyeed ee warqadda lagu kaydiyo qolal qufulan oo aanay dadka ka baxsan geli karin. Hawlahi hiwaayadda, waa inaad had iyo jeer la qiimeeyaa haddii, tusaale ahaan, uu jirowax sabab ah oo la socda liiska xubnaha naadiga iyo macluumaadkooda shakhsii ahaaneed.

Marka la falanqaynaayo xogta, waa in la tixgeliya waxyaabaha ay suuraggalka tahay in ay ku keenaan carruurta iyo dhalinyarada, haddii xogta shakhsii ahaaneed ay gacanta u gasho cid kale. Ilmaha ama qofka yari ma rabo in carruurta kale iyo dadka waaweyni ay ogaadaan dhammaan xogtooda gaarka ah. Xogta gaar ahaaneed ee sida taxaddar la'aanta ah loo falanqeeyo, waxay yeelan kartaa dhowr cawaaqib xumo, sida:

- Akhbaartii oo gaarta koox aad u ballaaran, tusaale ahaan baraha bulshada
- Qashqahsaad
- dhaawac sumcadeed
- xatooyada aqoonsiga
- waxyeelo dhaqaale oo soo gaarta carruurta iyo dhalinyarada ama waalidkood.

Diiwaangeliyaha waa inuu hayaa tilmaambixinno ku saabsan halka iyo sida loo kaydiyo xogta hiwaayadaha iyo tababarahee ama hagahee ayaa xaq u leh inuu falanqeeyo xogtaas.

Goorma ayaa sawiro ama fiidiowyoy la daabici karaa hawlaha hiwaayadda?

Haddii naadi ama urur qabanqaabiya hiwaayad ay ku daabacaan sawirada dadka xiiseeya kanaalka ay ku leeyihiiin baraha bulshada ama bogga internetka, waa inay fasax ka codsadaan dadka sawirka ku jira. Daabacaada sawirrada iyo fiidiowyada waa la ogolyahay haddii hiwaayadluhu uu bixiyay ogolaanshihiisa. Haddii hiwaayadlaha uu daabaco sawir ama muuqaal hiwaayad-yaqaan ah oo aanu hiwaayaduhu doonayn internetka, hiwaayadda ayaa codsan kara in walxaha laga saaro.

Asal ahaan, qofka ku daabaca sawir ama muuqaal madal warbaahinta bulshada ah, waa in loo tixgeliyaa inuu yahay diiwaanhayaha xogta, kaas oo sidoo kale ku xiran waajibaadka maamulaha xogta, haddii uusan arrinku ahayn isticmaalka shakhsii ahaaneed. Xaaladdan oo kale, daabacaadda sawirada iyo fiidiowyada waa in ay lahaadaan habraaca waafaqsan Xeerka Ilaalinta Xogta Guud, sababtoo ah daabacaadda sawirada iyo fiidiowyada waa falanqaynta xogta shakhsii ahaaneed. Marka la daabacayo sawirada iyo fiidiowyada, hagayaasha iyo tababarayaasha hawlaha hiwaayadda waa inay ku xisaabtamaan inay u dhaqmayaan magaca diiwaanhaya xogta, taas oo aan ahayn inay sawirada u soo bandhigayaan oo keliya isticmaal shakhsiyadeed.

Xafiiska wakiilka ilaalinta xogta ayaa, haddii loo baahdo, amri karo qabanqaabiya waxqabadka hiwaayadda inuu ka saaro sawirrada ama fiidiowyada shabakadda internetka. Xaaladaha qaarkood, wakiilka ilaalinta xogta ayaa sidoo kale ku amri kara tababaraha ama hagayaasha ee haya diiwaanka xogata, in ay ka saaraan sawirrada ay ku soo baahiyeen akoonkooda u gaarka ah ee warbaahinta bulshada.

Qofka hiwaayadda leh wuxuu iska qaadi karaa sawiro iyo muuqaalo si uu ugu isticmaalo oo uu ku daabaco baraha bulshada. Had iyo jeer waa caddaalad in dadka ka muuqda sawirka iyo muuqaalka la weydiisto ogolaansho si loo baahiyo.

Yaa loo oggol yahay inuu ka shaqeeyo xogta shakhsii ahaaneed ee hawlaha hiwaayadda?

Hawlaha hiwaayadda leh, dadka mas'uulka ka ah ilmo ama qof dhallinyaro ah ayaa caadi ahaan awood u leh inay isticmaalaan xogta gaarka ah. Tusaale ahaan, macalinka kooxda isboortiga ayaa laga yaabaa inuu xaq u yeesho inuu socodsiyo macluumaadka xiriirka ee xamaasadda, si uu macalinku ula xiriiro hiwaayadlaha, tusaale ahaan, isbeddelada jadwalka ee tababarka.

Macallimiinta iyo hagayaasha waxay sidoo kale u baahan karaan macluumaadka shakhsiyeed marka la diiwaan gelinayo tababarka. Naadiga hiwaayadda ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu haysto shaqaale ka shaqeeya kharashka xubinnimada. Waxa uu ka baaraandegi karaa xogta gaarka ah si kharashka hiwaayadda loo soo dalacsiyo.

Waxa kale oo laga yaabaa inay muhiim u tahay macalinku inuu ogaado cudurrada hiwaayadda leh ee ammaankiisa, si loo ogaado calaamadaha jirrada. Macluumaadka ku saabsan xasaasiyaddu waxay noqon kartaa mid muhiim ah, tusaale ahaan, xerada ama safarka halkas oo macalimiintu ay cuntada ku diyaariyaan.

Qabanqaabiyaha hawsha hiwaayadda waa inuu xaqiijiyaa in dadka aan fasax u haysanin aanay arki karin xogta shakhsii ahaaneed. Sidoo kale lama oggola in xogta shakhsiga ah lagu wareejiyo dad dibadda ka ah.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union

Goorma aaya la shaacin karaa macluumaadka hiwaayadaha?

Shaacinta xogta shakhsii ahaaneed waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, in la siiyo tafaasiisha ilmaha hiwaayadda u leh waalidkiis ama, siinta macluumaadka halka lagala xiriri karo ilmaha ee naadiyada ama ururrada, ama in la baahiyo natijada tartanka si loogu qoro bogga internetka.

Bixinta xogta shakhsii ahaaneed waa in loo sheegaa dadka la diiwaangeliyay oo loola jeedo carruurta hiwaadlayaasha ama waalidkeed. Asal ahaan, xirfadlaha waa inuu helaa macluumaadka ku saabsan wareejinta xogtiisa mar hore marka uu siiyo xogtiisa gaarka ah hiwaayadda.

- Haddii, tusaale ahaan, hawladeenka hiwaayadda uu si joogto ah u siiyo xogta gaarka ah ee carruurta bogga internetka ee daabaca natijjooyinka tartanka, ilmaha waa in mar horeba arrintan loo sheego marka uu bilaabo hiwaayadda.

Xogta shakhsii ahaaneed cidna looma sheegi karo. Asal ahaan, xogta gaarka ah ee ilmaha looma sheegi karo, tusaale ahaan, carruurta ku ciyaarta koox isku mid ah ama waalidkood ama cid kale oo gebi ahaanba ka baxsan.

Haddii lagu weydiyo macluumaadka shakhsiyeed ee ubadka, oo aadan garanayn waxa lagu sameynaayo, la xiriir maamulka ururka ama qof kale oo weyn oo ka shaqeeya hiwaayadda, sida tababaraha. Mas'uuliyyadda habaynta xogta shakhsiyeed had iyo jeer waxay saaran tahay ugu horrayn dadka waaweyn ee ka shaqeeya ururka.



OFFICE OF
THE DATA PROTECTION OMBUDSMAN



Funded by
the European Union